Baarista kansarka

Hadii uu qofku qabo calaamadaha kansarka, dhaqtarkiisu wuxuu u diri baarisyo cadeynaya in qofku qabo kansar. Waxayna caadiyan tusi meesha uu kansarku kaga yaalo jirka. Waxa jira baarisyo caadi u ah kasnsarka. Qafka qaba calaamadihiisa waa in uu maro in ka badan hal baarisyadaasa. Waad u soo kaxeysan kartaa qof ku yaqaan barista.

Waydii dhaqtarkaaga ama qofka barista sameynaya:

- Inuu kuu fasiro wax kasta oo aadan fahmin.
- In uu kuu qabto turjubaan hadaad u baahan tahay.

Ukuurgelida (examination)

Hadii qofku uu qabo barar aan caadi ahayn, dhaqtarka waa uu eegi oo uu dareemi bararka, hadii uu qofku qabo xanuun, dhaqtarku waa uu dareemi meesha xanuunsan. Dhaqtarka waxaa xitaa laga yaabaa in uu dareemo agagaarka bararka ama meesha xanuunsan .

Barista dhiiga ama kaadida

Kansarada qaar (sida kansarka prostate, kansarka ugxan sidaha) waxa ay sameeyaan walax raacda dhiiga ama kaadida. Tani ayaa u sheegeysa dhaqtarka in jirka kansar ku jiro. Dhaqtarku waxaa laga yaabaa in uu qaado dhiig, isagoo isticmaalaya cirbad ama uu ku weydiiyo kaadi la baaro. Dhaqtarku wuxuu u diri dhiiga ama kaadida sheybaar lagu baaro.

Raajo (x-ray) ama dulmare (Iskan)

Baarisyadan waxaa la isticmaalaa mashiino si jirka loo dulmariyo. Waxay sameeyaan sawiro ku tusinaya waxa ku jira jirka gudihiisa, tusaale ahaan xubnaha, buruqda. Mashiinku waxa uu isticmaalaa shucaac, birlab,mowjadaha radiyaha ama mowjadaha dhawaqa oo qiyaasa sidii looga cawimi lahaa sameynta sawirada.

Ka hor dulmarida qofka waxaa laga yaabaa in uu wax cabo ama lagu duro biyo qaasa. Biyahani waxay cawimi in ay muujiyaan qeybaha jirka gudihiisa ah. Waxaa laga yaabaa in qofka la yiraahdo waxba ha cunin oo ha cabin saacado ka hor dulmarinta. Meshiinka iskaanka waxa uu yaal qol qaasa. Qofka ku shaqeynaya mashiinka ayaa laga yaabaa in uu joogo qolka, ama uu tago qol ku dhagan. Hadii lagu saarayo dulmaraha waxaa laga yaabaa in lagu weydiiyo in aad iska saarto dharka qaar oo aad gashato dhar qaas ah. Qofka ku shaqeynaya mashiinka ayaa kuu sheegaya meeshaad seexaneyso mashiinka ayaa agagaarkaaga ama dushaada ku dhaqdhaqaaqaya isagoo sawiro qaadaya. Booska mashiinta dhexdiisa waxaa laga yaabaa in uu yar yahay. Hadii aad ka baqeyso ku jirida meel cariiri ah u sheeg qofka ku shaqeynaya mashiinka. Isku day in aad is dejiso adigoo xiranaya indhahaaga. Marmarka qaar mashiinku wuxuu noqon karaa mid sharqama .

Dulmaraha caadiyan waxaa la iska saaraa isbitaalada ama bukaan socod eegto qaas ah. Qaar wuxuu qaataa shan daqiiqadood qaarna ka badan. Waa iska caadi in uu dareemo xoogaa walwal ah qofka la saarayo dulmaraha. Dulmaraha kuma xanuujinayo cudurna kuguma ridayo.

Baarida Scoping

baaritaanadan tubo aad u yar oo nal iyo sawir qaade ku dhegan yihiin ayaa la gelinayaa jirka. Dhaqtarka waa uu dhaqdhaqaajin karaa tubada. Sawir qaaduhu wuxuu sawirada jirka gudihiisa kugu tusineysaa muraayad sida telefishinka ah. Dhaqtarka wuxuu kaloo gelin tubo si uu cad uga soo qaado oo uu ku eego weyneyso (microscope). Tani waxaa lagu magacaabaa biopsy.

Intaadan sameyn baarisyadan mid ka mida waxaa laga yaabaa in qofka loo sheego inuusan waxba cunin ama cabin intii mudo saacado ah. Marmar qaasa ayaa qofka la weydiiyaa in uu cabo cabitaan qaasa ka hor baarista ; tani waxay ka cawimi in sawiradu noqdaan faseex.

Qofka waxaa laga yaabaa in la siiyo daawo dajisa ka hor barista si uu u dego. Qaar ka mida baarisyada dadka waa la suuxiyaa si aysan u dareemin xanuun. Baarisyadan waxaa caadiyan lagu qabtaa isbitaalada wuxuuna qaataa ilaa hal saac. Dadku waxay u baahan yihiin in ay isi siiyaan ilaa hal saac ka hor iyo hal saac ka dib barista.

Somali

Diagnosing cancer

Qadka warbixinta kansarka:
- **Somali (03) 9209 0169**
- **English 131120**

1 Rathdowne Street
Carlton Vic 3053
Australia
Telephone: 61 (0)3 9635 5000
Facsimile: 61 (0)3 9635 5270
enquiries@cancervic.org.au
www.cancervic.org.au

January 2004

Baarista kansarka

Caadiyan waa ay tegi karaan gurigooda markay ka ba'do suuxisadu.

Dhaqaatiirtu waxay u baahan yihiin in ay ogaadaan ka hor barista in qofku wax daawo ah qaadanayo. Daawooyinka qaar baa saameyn ku yeelan kara sida qofka uga bogsoonayo barista. Dadka inta badan cabsi ayaa gasha Markey marayaan baarisyadan mid ka mid ah. Marmar waxay dareemaan xoogaa xanuun ah ka dib barista laakiin tani ma sii raagto.

Biopsy

Biopsy waa qaadida qaar unugyada ka mid ah si weyneyso loogu eego. Hadii ay unugyadu dheecaan ku jiraan waxaa lagu soo qaadi cirbad. Hadiise ay unugyadu ku jiraan hilib waxaa banaanka looga soo bixin iyadoo la isticmaalayo mindi yar ama qalab la mid ah. Unugyada kansarka waa ay ka muuqaal duwan yihiin kuwa caadiga ah, marka pathologist ayaa sheegikara hadii qaar unugyada ah ay qabaan kansar.

(pathologist waa eegaha biopsiga.) unugyada ku jira biobsiga waxa ay u baahan yihiin in la midabeeyo si uu u kala saaro pathologistaha hadii kansar jiro iyo haduusan jirinba. Waxay qaadataa ilaa iyo asbuuc si loo helo jawaabta biopsiga.

Intii aadan marin biopsiyada, qofka waa la suuxin guud ahaan, taasoo seexineysa. Qofka waxaa loo sheegi in uusan waxba cunin ama cabin saacado ka hor suuxinta guud. Dhaqtarka ayaa tolaya maqaarka ka dib hadii loo baahdo.

Inta badan biopsiga waxaa lagu sameeyaa isbitaalada. Biopsiga yarna waxaa lagu sameyn karaa dhaqtarka. Biopsiyada waxa ay qaadataa ilaa shan iyo toban daqiiqo. Isa sii waqti badan ka hor iyo ka dib biopsiyada si aad diyaar ugu noqoto ka soo reysashada suuxinta. Waa iska caadi in dadku dareemaan cabsi markay marayaan biopsiga. Marmarka qaar xoogaa xanuun ah ayey leedahay baarida ka dib laakiin maaha mid raagta. Dhaqtarka ayaa kuu sharaxaya sidii aad u xanaaneyn lahayd tolida dhaawaca.

Sidaad u dareemi lahayd haddaad qabto kansar

Baarisyadaas ayaa sheega haduu qofku qabo kansar, meeshuu ku yaal iyo haduu fiday. Hadii baaristu sheegto in aad qabto kansar dhaqtarkaaga ayaa kuu macneyn taas iyo wixii aad la kulmeyso. Jawaabta inta badan baarisahan waxa ay qaataan maalmo yar sidii loogu soo diri lahaa dhaqtarkii codsaday barista. Waxaa laga yaabaa in qofku u baahdo in laga qaado in ka badan hal baaris, marka waxa ay noqon kartaa maalmo ama setimaano in ay ogaadaan in ay kansar qabaan.

Caadiyan dadka waa ay naxaan ama filanwaa ayey ku noqotaa marka loo sheego in ay kansar qabaan. Hadii laguu sheego in aad kansar qabto waxaa laga yaabaa in aad dareenkaaga kala hadasho saaxiibadaa ama qaraabadaada ama waad weydiin kartaa dhaqtarkaaga sidii aad ula xiriiri lahayd la taliye.

Somali

Diagnosing cancer

Qadka warbixinta kansarka:

- **Somali (03) 9209 0169**
- **English 131120**

1 Rathdowne Street
Carlton Vic 3053
Australia
Telephone: 61 (0)3 9635 5000
Facsimile: 61 (0)3 9635 5270
enquiries@cancervic.org.au
www.cancervic.org.au

January 2004